# Dahirow Xaal Qaado: Waxaad tahay ASTAAN QARAN, waxaanad naga MUDANATAY XUSHMADEEDA IYO QADARINTEEDA heer QARAN.




Afeef, horta iyada waan iska dhaafay waa hore inaan internetka wax ku qoro oon yooyootanka bilaa u jeedada qayb ka ahaado, sababta oo ah khayr iyo mansab midna kuma ogi oo kollayba qoraalada inkasta ood isku daydo inaad turxaanta iyo xajiintaba ka ilaalisid cid uunba si xun u qaadan. Kolkaa cid kasta oo Haddaba saaka ujeedada iyo arrinka aan qalinka u qaatay maaha mid siyaasadaysan, beelaysan ama u jeedo kale leh. Sidaas darteed cid kasta oo arrintani meel ka soo gasho ha ogaado waxaa soo galiyay kaliya shaqadiisa/xilka uu qaranka u hayo oo anigana meesha isoo galiyay.

Haddaba haddaan u soo noqdo dulucda arrintani, sidaan la wada socono waxaa shalay debadda ka soo laabtay Madaxweynihii hore mudane Dahir Rayaale Kahin. Waxaaxnse qaadan kari waayey sida la *leeyahay waa loo soo dhaweeyay iyo habka loola dhaqmay ergadii soo dhaweenasay.*
Marka hore aan isla fahamno: *Who is Dahir Rayaale kahin?, Muxuu u taagan yahay?, Muxuuse maamuus iyo qadarin inaga/qaranka (shaqsi kasta iyo xukuumada) mudan yahay mudan yahay?,Waajibse qarameed ma tahay in meel sare la dhigo maamuuskiisa?*

Haddii si fiican/saxa oo caafimaadta loo eego Dahir Rayaale waa madaxweynihii sideedda sanadood dalka xukumi jiray. Wuxuu sida caalamka laga ogyahay taariikhda Afrika ka yahay madaxweynihii ugu horeeyay ee ku yimaada hab dastuuri (Constitutional President) ah markii uu geeriyooday madaxweynihii ka horeeyay Allah ha u naxariistee Mohamed Haji Ibrahim Egal.
Wuxuu yahay madaxweynihii sida dhabta u hirgaliyay habkan ku dhisan axsaabta badan ee dimuqradiyada ah een ku dhaqano ee nadduunyada ammaan iyo xushmadba kaga mutaysanay inoona qirtay.
Waxaa ka mid ah guulaha lama ilaawaanka ah ee cahdigii Dahir waddanka ka qabsoomay kana hirgalay waa sidatan hoos ku xusan;

1. Doorashooyinkii golayaasha deegaanka,
2. Doorashadii ugu horeysay ee madaxweynetinimada ee ebid ka dhacda gayiga Somaliland
3. Doorashadii ugu ee golaha wakiilada
4. Doorashadii ugu dambaysay ee madaxtinimada ee markii laga helay uu sida xaragada leh een Afrikada kale ka dhicin uu u qirtay in laga guulaysatay, taladiina si xufan u wareejiyay

*Kaliya ahaansha madaxweynihii* hore ee Jamhuuriyadda Somaliland

ayaa ka sii muhiimsan qodobadan aan kor ku xusay oo uu inagaga muttaystay Xushmad, Qadarin iyo maamuus-qarameed.
Arrintan uu mudane DRK madaarka Hargaysa markii uu soo degayay kama turjumayso maqaamka uu inaga mudanyahay inaan madaxweneheenii hore ku qaabilno.
Waxay ahayd in heerka madaxweyne qaran oo habmaamuuskii iyo karaamadiisii u dhan tahay lagu soo dhaweeyo. Waxaa is weydiin leh ROOG CAS ma u dhignaa, sideen salaan sharaf u siin karnaa ilayn waa inagu waajib inaan xurmaynaa oon u muujinaa inaan nahay dadweyne, iyo xukuumad garanaysa oo qiraysa sharafta iyo karaamada uu Ex-president nagu leeyahay. Waxay ahayd in xukuumaddu oo waliba madaxweyne Siilaanyo amro habka iyo heerka loo soo dhaweynayo oo uu diro toro askar ah oo salaan sharaf (maha heerka madaxweyne hadda talada haya) siisa 5-6+taliyahooda . Haddii taasi aanay dhicin oon wax protakool ah loogu talo galin, waxaa la gudboonayd wasiirka duulista inuu isagu is-xilqaamo oo uu horkacaba ergada u timid soo-dhaweynta DRK, oo uu xusho tiro mug leh iyo ashkhaasta ugu muhiimsan inta goobta timid oo uu gudaha garoonka ugu tagaan tiro badan. Meeyse ahayn inuu u gudaha garoonka dad mudda-kar ah oo hogaamiyaal ah. Taasi waxay inoo horseeday hoos-u-dhigid iyo meel-ka-dhadhac loo gaystay madaxweynihii hore oo sababtay inuu iska soo dhaafo qolkii VIP da markuu arki waayay sabab uu u galo.
Waxaase ka sii daran markii arrintaas foosha xumi dhacday halkii laga filayay raali-galin iyo wax kale in wasiirkii duulisto shir jaa'id qabto kuna sheegay in maanta wixii ka dambeeya meeqaamkii dadka lagu soo dhaweeyn jiray hoos loo dhigay. Goormuu soo baxay sharcigaasi? Ma mudane DRK ayaa loogu talagalay hoos-u-dhigidda habmaamuuska? Miyaanuse ogayn hadal/ficil  kaste oo uu yidhaahdo/geysto inuu ku metelayo madaxweyne Siilaanyo oo dusha u ridanaya wixii xumaan iyo wanaag ah ee wasiiradiisu sameeyaan. Inaad xustaa oo hibataa mudane DRK markuu talada hayay eed adiguna (not idinkuna) aanad xil hayn waa CEEEEB sida ka muuqatay hadaladaadii.
Madaxweyne Siilaanyo waxaan leeyahay qaad talaabo cad oo wax ka bedelaysa inaanay tan oo kale dhicin, meelna saar oo shacriyee/waajibi distoori ah heerka iyo habmaamuuska madaxweneheenii hore Dahir Rayaale Kaahin.
Madaxweyne waxaan kaa codsanayaa inaad arrintani ka mid noqoto isbedelkii aan ballanta ku galnay wakhtigii ololihii doorashada. Waxay u kalsooni lagu qabo kolba xisbiga haya talada dalka oo taageerayaasha mucaaridka ayey soo jiidanaysaa mar haddii madaxdooda la tixgaliyo.

Wa Billaahi Tawfiiq
Eng. Ahmed Abdullahi Obsiye
Oslo, Norway



email: ahmed-ob@online.no